# Golaha Wakiilada JSl

## *Minuteska*

## Dooda Miisaaniyada Qaranka ee 2012

**01/04/2010**

Dooda waxa ka qayb galay10 mudane waxayna socotay hal-maalin

1. **Md. Cabdiqadir X. ismaaciil jirde: -** Waxaa qurux badan in laga fudeydiyo sidaasay ( Intitution)naduna ku dhismayaan, ayaan tii hore waxaan is dul taagney laba (item) oo maamulkeeda la hoosgeeyay Miisaaniyada Madaxtooyada kuna culus, labadaa item waxaa weeye tan hore waxaa weeye Miisaaniyada Hay'adda Sirdoonka Qaranka Anigoo tafaasiil ugalaya waxaynu halkan ka baas garaynay Xeerka Guud ee Nabad Galyada iyo Anshaxa Qaranka, xeerkaasi waxa uu waajibiyay oo jideeyay hay'ad Qaran oo comition ama council ah oo u xilsaaran tilmaanta iyo hagida howlaha nabad galyada.

   Hay'adaasi waa in ay stablished tahay oo ay secraterial leedahay xubnaha ku jiraana waa xubnihii Qaranka ugu sareeyay, lakiin waa hawl maalmeedka secretarial socod siyaa uu jiraa, Waxaana haboon hay'adahaas oo kale maadaama madaxa hay'ada sirdoonku xubin ka yahay komishanka oo waliba uu xubin muhiim ah ka yahay, waxaa haboon in aan hay'adii meelkale la marin ee sacreterial kaa ay leedahay oo waliba laga yaabo in secreterial ka laftiisu in uu noqdo madaxa hay'ada sirdoonka in uu noqdo secreterial ay hoos imanayso hawsha oo dhami. waxaana boon in Miisaaniyada intaa leeg ee 5 milyan iyo dheeraadka ah aan lagu culaysin hawl-maalmeedkii Madaxtooyada

   Waxaan qabaa in aanay wasaarada madaxtooyadu u qalabaysnayn una dhisnayn in ay maamusho kharashaadka iyo hawlaha in taa leeg , maaha in aan cid duraayo ee waxaa weeyaan Intitutionadii dhismi mayaan inoona kobci maayaan xeerbaan halkan baas garaynay oo xeer Qarana ah oo aduun koo dhan lagaga dhaqmo, gudidii waan samaynay national sucurty councilka oo meel lataabto oo Madax ka saraysaa majirto in hay'adaa ladaayo iyo secreterialkeeda in ay maamusho kharashka hay'ada sirdoonka oo madextooyada kuma abtirsato hay'adaasi waxaa kale oo miisaaniyada u jiray horana ugu jiray oo ay nu doodeheenii horana ku soo darnay lakiin se macal asal aan saamayn ku yeelan Miisaaniyada n lacagtaa lix iyo tobanka bilyan ah (16 bilyan) ee gurmad ka iyo hawlaha lama filaanka ah iyadana waxaynu nidhi dee hay'adaa jira u xilsaaran hawlahaas iyada lafteeda maxadextooyadu maamulkeeda wax bay ku yeelanaysaa, gurmadkaasi dhawr qaybood buu noqonkaraa

   - Wuxuu noqon karaa Masiibo timiday
   - Wuxuu noqon karaa Abaaro baah san

- Wuxuu noqon karaa Colaado Beelo ka dhacay sida kuwa maantaba socda ee la leeyahay meelo ayay ka socdaan

Markaa in meel mucayina wasaaradii Gaashaan dhiga ayaa joogta, oo ciidankii gurmadka ee baxayay sahaydoodii, shidaadkoodii iyo kharashaadkii kale ee la ma filaanka ahaa ee wasaarada u jiray cida qaadeysa ee isticmaalaysaa waa iyaga, hadii laba beelood isu dhacaan cida kharash kaa qaadeysaa waa Wasaarada Arimaha Gudaha iyo Ciidankii Booliska, haday Gurmad Abaareed noqoto oo abaaro loogaga gurmanayo cida qaadeysa waa Wasaarado gaara.

Waxaa haboon markaa in contigency kaasi imikaba fulinlahaa (imliment)garayn lahaa la hoos geeyo lacagtaa, aykuna (control)sho qaabka loogu dhaqmayo, qaabka loo ansixinayo iyo qaabka ay u fulaysaba, Wasaarada Maaliyaduna ay noqonayso igency controlka lahayd cidii ogolaansha bixinaysayna ay noqoneyso national sucurty councilka waayo Abaartiiba securty ayay galeysaa oo food securty ayay galaysaa in markaa iyana laga hoos qaado Madextooyada oo aan lagu culaysin, ee contingecy gaa imikaba halkii ay lahayd lageeyo, hadii kala waxaa dhici doonta in toban saxeex loo baahdo gaadhiga shidaalka ah ee tichnicalka ah ee loogu gurmanayo seemaal in toban saxeex loo baahdo emergancyna toban saxeer la is ka heli maayo.

Waxaa haboon, waxani waa wax soo noqnoqdey, wax inagu cusubna maha, Mandaqadan ilaahay inagu abuurayna waa wax bulshada tobanaan sano u joogi doona, in markaa jaho-wareerka ha laga baxo hana la fududeeyo hawsha, oo contingancygaa imikaba la sii qaybiyo cida gudan lahayd, uothorityga ha ka doonto Wasaarada Maaliyada national securty councilka lakiin loo fududeeyo igaya oo la hoosgeeyo imikaba oo imikaba ogyihiin oon ay meel u taalo ee aan loo soo baryo tagin madax tooyada.

Waynu ognahay bani Aadam baynu nahay istitutionada cilaaqaadka ka dhexeeya waxaa wax ka badala, cilaaqaadka ka dhexeeya labada qof ee madax da ka ah personal issue ayaa soo kala dhex gali kara, oo markaa qofka lacagta saxeeya oo uuna ka tir sanayn hawshii, had iyo jeer sida qofka ay u wada shaqeynayaan baa ku xidhan, oo dadka qaarna waa uu u jajabnaanayaa qaarna dad wada shaqyn karaba maaha, markaa in sidaa loo adkeeyo maahee in la fududeeyo ayaan taa qabaa.

- ✓ Takale waaxda Garsoorka

Aad iyo aad ayaa looga hadlaa lakiin se waxaad moodaa in aanay dhab inaga ahayn Garsoorka wax laga qabto, madexweynuhu wax badan ayuu ku celceliyay oo uu halkana ka hadlay meelo badana ka cadeeyay hadana horu-mar badani ma jiro.

Halkan waxa uu ku haynaa Xildhibaan Cabdiraxmaan hayaa Gudoomiyaha Maxkamada sare oo ah madixii cadaalada cabasho uu ka soo jeediyay Miisaaniyada oo uu kaga cabanayo Miisaaniyada , Xalay waxaan la joogay niman Garsoorayaal ah oo max kamadaha hoose ah waxay sheegayaana waa argagax garsoorkana dhibaatada haysataa waxaa weeyi waa Agoon sadex dii dhadhaar ee Qaranka waa ka ugu daciifsan, waa ka maarka Golaha wasiirada Miisaaniyada lagu naaqishayo cidi u

fadhiyin. Wasaarada cadaalagu weyka yara duwan tahay oo xukaamta iyo hawlahaa shaqadooda ma gasho rehumendion kooda, dalicintooda, lacag siintooda, badal kooda, dhiiri galintooda, intaba waxaa iska leh Gudidda Cadaaladda, Gudidii cadaaladana madaxdoodii meesha ma fadhido, dhaqankaana malihin oo ma nidhaahno Al ------------------ lakiinse waxaa uu noqdaa agoonkaa yar ee aan cidina u hadal, markaa inaga waajib baa inaga saaran hadaynu xildhibaanadii nahay, Qarankaa qaybtiisa dhan ee aan cid u hadasha lahayn in aynu u hadalno.

Misaaniyadooda saluug weyn ayay ka muujiyeen weyna ka muuqataa aad iyo aad ayay uga muuqataa, max kamaduhu wey fideen oo meel walba way gadheen oo afar iyo lixdan(64) max kamadood ayaa dalka ka dhisan sideed (8) waa Rafcaan sideed(8) maxkamad gobol kontona(50) waa maxkamad dagmo.

Waxay soo cusbooneysiiyeey nidaam waagii hore ee Engriiska jiri jiray oo ah in ay gaarsoorayaashu u baxaam dibadaha oo halkii kiisku ka dhacay tagaan oo ay soo qaadaan, taasina waxay u baaahan tahay dhaqaale, habeen dhax ayay u baahan tahay, gaadiid bay u baahan tahay mana muuqato in halkaa laga kabay Garsoorka .

hay'adaha mucaawimada bixiyaa waa ogtihiinoo hadii aanad aduu marka hore salada wax ku ridan, iyana waxba kuma soo ridayaan, way eegayaan budgetka aad ugu qoondeyso uma arkayaan aduu hadaanad priorty u arkayn kana muuqan meyso Miisaaniyada , haday Miisaaniyada ka muuqan weydana iyagiina periorty uma aha oo pressure na ma saarna.

Waxaa kaloon ka hadlayaa Miisaaniyada waxaa kordhay 109 bilyan anigoon Wasaarada shaqadeeda waxba u dhimeyn aad iyo aadna u amaanaya hawshaa ay soo qabatay, hadana waxaa igu adkaatay boqoliyo sagaalkaa milyan (109 bilyan) ee kordhay more then 40% halwasaarad ayuun bay u korodhay waana wasaarada Maaliyada wayna libinlaanbantay misaniyadeedii dhawr iyo afartanka bilyan ahayd waxayna maraysaa lix iyo sideetan bilyan (86 bilyan).

Gudiduna soo may hadal qaadin oo may justify garayn waxaa kalifay korodhka intaa leeg waxaan u maleynayaa in golahani xaq uleeyahay korodhka intaa leeg ee boqol iyo sagaalkii bilyan ee umada oo dhan u kordhay, ee hay'adihii dawliga ahaa u kordhay, in ay qayb kamidihii 40% isu qoondeyso markaa su'aashaasina wey taagan tahay waana in wax la iska weydiiyo weeyi.

Waxaan kaloon jeclaan lahaa in Miisaaniyadani degdeg inoo dhaafto oo ayna inagu daahin, waxyaabo kale oo aan hadal qoraaladii hore ka soo saaray in aan marwalba codsanaa Miisaaniyadana, macluumaad wuu la socdaa oo waxaa la socda miisaaniyadii hay'adaha madaxa banaan, waxaa inaga maqan oo aynu ilaa golayaashii hore ku celcelin jirney macaawimada dibada ka timaada, Wasaarado ayay hawlahoodii wax ka bixisaa haday waxbarshada tahay, haday hawlaha guud tahay, hadey xoolaha tahay, iyo hayday caafimaadka tahayba. Wasaaradaa la kabaa oo si indirect ah loo kabaa markaa magaran karno markaa cida meesha ku dulman ee ku qatan hadaynaan ogayn wasaaraduhu sida ay u helaan mucaawimada, ee ay u kala

badanyihiin. wax hawl badana qaadaneysa maahan in lahe oo waxaa jira focal piont kii wasaarada qorshaynta ayaa ka warheysa sacter walba wax lagu kabo taa lafteedu way maqan tahay wax meel fog laga raadinayana maahan ee waa mi laweydiinayo wasaarda Qorsheynta, oo layidhaah do maxaa lagu kabaa Wasaarada Arimaha Gudaha, maxaa lagu kabaa Wasaarada caafimaadka, oo aad halkaa markaa ka dheehato Wasaaradani in ay dulman tahay iyo in aanay dulmanayn.

Dee xaqna waynu u leenahay oo waa in aynu ogaano, waana waajib ina saaran, la xisaabtami mayno hay'adaha oo cid baa u xilsaaran in ay la xisaabtanto. Lakiin se shaqadeena ayay ku jirtaa, oo wax yaabaha aynu daba galeyno ee aynu ku control executive ka in aynu inagu kaantaroolno ayay nu halkan u fadhinaa, wixii soo gala hayday naan ogeyn ee dibada ka soo galey ee aynu ku koobnaano waxa Miisaaniyadani u qoondeysay hawsheenii badh baa maqan iyana waa waajib in ladoono oo la soo helo

2. **Md. Faarax Maxamud Cabdule:-** horta runtii waynu ka doodnaa miisaaniyada oo in badan baa laga doodaa, hadana waxaa weeyaan waxba iskama badalaan oo waxaynu ku ansixinaa sideedii, dastuurkuna wuxuu tilmaamayaa in Golaha Wakiiladu wax ka badali karo waxaa muhiima in doodeena waxa majooritiga la isku raaco dee in wax ka badalka miisaaniyada lagu soo daro, waxaa miisaaiyadan ka muuqda in miisaaniyadii ka horeysay ee 2011kii ay soo wada bixi weyday oo ay k dhinaatay 7, 200,000/=, waxaa kaloo tan ku cad in la kordhiyay oo tii hore ka badan tahay 109 milyan, halkaa waxaa weeye wax weyn baa ku jira, waxay ahayd in hadii wax la kordhinayo in intaa wax ka yar la kordhiy ayay ahayd balse hadii wasaaradu tiri waanu soo saareynaa dee inagu idiidimeyno, laakiin waa mid aad iyo aad ka fiirsasho u leh in iyadoo tii hore ay isdhintey tana la kordhiyo xadiga intaa le'eg.

   Waxaa kaloo miisaaniyadani ka duwan tahay miisaaniyadii hore oo dedaal ah oo aan ku arkay in waxyaabo badan oo horumar ah ku jiraan, inkastoo aan qabo in horumarka la sameyno ay wasaarada Qorsheynta ay assessment sameeyaan oo ay soo maraan dhulkii oo meesha police u baahan, meesha dhakhtar u baaha, meesha iskuul u baahan in iyadoo waxaas oo dhan la ogyahay miisaaniyadii la sameeyo, runtii waxaa iiga muuqata inaan la samayn kormeerkii ama assesmentigii lagu sameyn lahaa miisaaniyada, waxaan aad iyo aad uga xumahay oo aan ka muuqan horumarka miisaaniyda oo aan filayay in wuxuun laga soo dari karo haba yaraatee wada isku xidha ceergaabo iyo burco hana ahaatee 1 milyan in wuxuun laga soo daro, waxaan kaloo filayay wada isku barbera ilaa ceergaabo in iyadana wuxuun laga soo daro oo ah wada aad iyo aad u adag oo dadku dhibaato ku qabo, labadaa wado xukuumada cusubi waxyaabihii ay balan qaaday bay ka mid ahaayeen.

   Waxaan soo jeedinayaa in iyadoo waxa dalku ama miisaaniyadu qaadi karto loo eegayo in labdaa wado wuxuun laga soo daro miisaaniyadan, waxaan kalo iyadoo miisaaniyadu iyadoo korodhay in barnaamidka hawlaha shaqo ee labada gole in meesha laga saaray oo iyana meesha aanay ku jirin, taana waxaa weeye mar hadii miisaaniyadii haday korodhay

ilayn golayaashu hawl balaadhan bay hayaane in headkaa laga saaray lagu soo daro,waxaan kaloo soo jeedinayaa Gobolada Bari 2% ayaa miisaaniyada ugu jira, waxayna ku magacaaban tahay horumar, sidaa aawadeed waa in la cadeeyo oo la sheego Gobol walba waxa loogu qabanayo oo Horumar ah, waxaa ku cad iyadoo duuduuba iyadoo la leeyahay 2% Gobolada bari, Gobolada barina waxay leeyihiin waxba nalama siiyo, markaa waa in la cadeeyo waxa lagu qabanayo, tusaale ahaan laascaanood waxaas loogu dhisayaa, sanaag barina waxaas iyo waxaas baa loogu dhisayaa in la yidhaahdo oo ay kala cadaato waxa horumarka loogu qabanayo loona qaybiyo.
Waxaan ku raacsanahay Mudanihii iga horeeyay, Gudida Cadaalda iyo Garsoorka in hoos loo eego miisaaniyadooda, waxaan aad iyo aad wasaaradaha qaar miisaaniydood aad loogu talax tagay, waa in wax laga gooyo, waa inay cadaato waxyaabaha Wasaaradaha qaar miisaaniyda loogu kordhiyay ee ay ku qabanayaan.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Iyadoo Miisaaniyada waxyaabahaa soo jeedinay lagu daray in miisaaniadu ayna inagu raagin oo dag-dag u ansixino inkastoo aynaan sababteeda lahayn.

3. **Md. Siciid Cilmi Rooble:-** horta marka hore waxaan Golaha u sheegayaa kaftan yar maanata waan soo lugeeyay oo Golaha lug baan ku soo gaadhay, waagii hore had iyo jeeraale ama dadka Koleyada ha ahaato ama ku wa hudheelada ha ahaadaane markaan miisaaniyada la inoo keeno oo aynu ansixinayno waxaa dhagaheena ka badan jirtay War miisaaniyadii ma ansixiseen, cid alaale cid ila soo qaadeyna ma jirto saaka, baxasho markaa xukuumaduun bay ku kooban tahay shacbiga ma gashee inteynu doono baynu haysan karnaa, taasi qodob.

Warbixinta Gudida kuma jirto in lala kulmay Wasiiradii Maaliyada kan iyo kii horeba, shalaytona waa la qabsanay Md. Saleeban markuu lahaa laamun kulmin, hay'adii ku shaqada lahayd Miisaaniyada hadaanay Gudidu laba kulmin oo aan warbixin laga weydiin, ilayn inaga waxaa weeye inay inoo soo gudbiyaan wixii hanta gunteeda oo cidii xilkaa u haysay qaranka waa hawl baaqsatay oo Golaha u taal, waxaana soo jeedinayaa inta aynaan wax kale galin waa in Wasiirka Maaliyada loo yeedhaa, oo dastuuri Gudoomiye.

Tan kale waxaa jirtay sidaan ka warqabnay in Miisaaniyadii aynu ka doodnay dhowr iyo labaatan Hay'adood oo cusub oo aynu nidhi hay'adahan miisaaniyada ku jira shariciyadoodii meeye, ha la celiyo ayaynu nidhi, adna Gudoomiye waxaad tidhi intaynu u sii deyno qoraal baan u qorayaayoo 30 maalmood Gudohood ayay ku keenayaan lamina keenin, mid iyo labaa la keenay baan u malaynayaa, markaa hay'adahaa aan sharciga ahayn ee marlabaad golahan tixgalin waayay ha la joojiyo Miisaaniyadooda u madanu ha garato in Gole dhan oo sharci dejin ahi jiro, yaynaan ilduufin mar baynu feebar sameynay, 12 bilood iyo dheeraad baa ka soo wareegay, markaa yaan Hay'adahaa midh loo ansixin.

Meeshan waxaan u fadhinaa inaan umada u ilaalino dhaqaaleheeda, nabadgalyadeed iyo arrimaheeda gaar ahaaneed, waxaa jirtey markii hore dunidu qaab bay inagu caawin jirtey, waxaa ka warqabtaan in qaabkii la badalay oo xafiis Mucaanida reer galbeedkoo dhan ku dhacdo la magacaabay oo laga furay Dubia oo la magacaabay Gudi oo waliba Gudoomiyaheenu Xubin ka yahay, waana dhaqaale badan oo miisaaniyadan ka badan xafiiskaana sharciyadiisa garan meyno, waxaa loo badalay oo Gudidaa loo sameeyay oo Dubia hadaanu Somaliland nahay waxayagu meeshay maraan garan meyno baynu nidhi, waxaa la yidhi Gudi soo magacaba, waynu magacawnay oo 7 xubnood bay loo saaray, Xafiiska dhaqaalaha intaa le'eg ku soo dhacayso sharciyadiisii ma garanayno oo golaha lagama ansixin, transparency malaha, miisaaniaydana kuma jirto, miisaaniyda reer galbeedkuna manta 31 march ayay xidhantaa maantoo kalena way soo daynayaa lacag daad ah bay soo deynayaan lacagtaasi waa inay miisaaniyada waa in lagu soo daro, oo wasaarada Maaliyada dib ha loogu celiyo kuwaa horena ha ka soo saarto.

Qodobka kale waxa weeye, waxaynu galnay bad oo 19 maxbuus oo imtixaana ayaa daf la ina soo siiyay,

**Gudoomiyaha: -** Mudane Miisaaniyada ku soo noqo oo ka hadal.

**Md. S. C. Rooble:-** Kamaan bixin Miisaaniyadii uun baan ka hadlayaa Gudoomiye, ayaantii dhoweyd anigu jeel waan tagay oo taliyahaan ugu tagay, wuxuu ka cabanayay raashin la'aan iyo maacuun la'aan oo hadii miisaaniyada haday wax noogu jiraan dee bacdaa iyo dumarkaa is weydaaranayaa mey dhacdeen, iyadoo taa aynu la ildarnayn ayaynu 19 qaadicu dariiqa daf soo nidhi, waxaa la inoo sheegay in billion of dollars inay daba socoto nimankaa oo intaas oo jeel la dhisayo oo intaas cunto la siinayo, waxaas oo dhan kuma taal Miisaaniyada, wada khaldan bay marayaan dee markaa, oo wax la fulinayaa dee ma jirto mar hadaanay halkan ku jirin, Xoolahaa ay bada ku galnay ee Godobta ku galnay ha lagu soo daro, oo aynu ka faa'iideysano, inta wax imanayaana waxaan soo jeedinayaa in anigoo ka warqaba jeelkii oo maalin dhowayd soo maray waxaan leeyay 43 bilyan ee loogu daray Wasaarada Maaliyada 10 ka mida korodhka ha loogu daro Maxaabiista calal aqal.

Waxaan kaloo Gudoomiye ku darayaa, 39 degmo oo cusub oo madaxweynihii hore magacaabay ayaa jira, maamulkanina wuu aqoonsaday, 39kaa degmo mudadii 20ka bilood ee xukuumada cusubi jirtay xabad kaba lama siin maantana Hargeysay wada joogaan, xukuumadu may odhan waanu kala noqonay oo maaha degmooyin, waana degmooyin maamule maaha degmooyin Goleyaal leh, taana waxaan leeyahay maadaama ay xukuumadu aqoonsatay in wasaarada Maaliyada 43 bilyan ee korodhka ah marka laga jaro 10 maxaabiista aan jaray, inta kale degmooyinkaa kab ha looga dhigo waxay doonto ha u noqotee.

Waxaan kaloo soo jeedinayaa oo aan faarax dheere ku taageerayaa barnaamijkii labada gole ee laga wax laga jaray waa in lagu soo celiyaa, hadaydaan idinku ok siin.

**Waxaan soo jeedinayaa:**

- Korodhyadaa iyo isbadaladaa dartood iyo miisaaniyadaa aan idiin sheegay ee lacagtaa soo socotaa ee dalkaba ku fulin ee miisaaniyada aan ku jirin, dib ha loogu celiyo Wasaarada oo warbixinteeda hala in soo siiyo, Wasiirka Maaliyadana ha loo yeedho.

**Point of Clarificatino:- Gudoomiyaha:-** hal qodob baan jeclahay inaan ifriimiyo, anigu ma ogi sanduuq laga fura Dubia oo la yidhi lacagta mucaawinada ah halagu soo shubo, haduu mudanuhu ogyahay Golaha ha u soo bandhigo, saxaafadaha ha ka sheego oo ha cadeeyo.

4. **Md. Ibraahim Axmed Reygal:-** shir-gudoonka, mudanayaasha, Saxaafada iyo dadweynaha ina daawanaya iyo kuwa media inagala socda, waxaan ka hadlayaa dhawr qodob, horta iima suurta galin in miisaaniyada aan wada akhriyo, laakiinse dhowr qodob ayaan tacliiqyar ka dhiibanayaa, horta marka hore waxaan Wasaarada Maaliyada ku hambalyaynayaa inay sanadkan miisaaniyada ay ku jirto waxyaabo horumarineed, oo markii ugu horeysay waxaynu arkaynaa mashaariic horumarineed oo ku jirta Miisaaniyada togba taagtii ha rogmee.

Taa markaan ka soo gudbo, waxaan taabanayaa, ha noqdeen Wasaaradaha iyo hay;adaha Madax banaan ee loogu tala galay inay kharashgareeyaan miisaaniyada badankood in meelaha qaar wax lag jar-jaro loona weeciyo meelahan.

- In sidii xukuumaduba balan qaaday in shaqaalaha iyo ciidamaa 300% loo kordhin doono mudada ay xukunka hayso oo 100% hore loo kordhiyay, in si sanadba in loo kordhiyo sanadka shaqaalaha aqoontooda, kartidodu iyo daacadnimadooda dhisan tahay iyo Ciidamaada in 50% loo kordhiyo.
- In wasaarado muhiimada gaara leh, laakiin mudnaantii Miisaaniyada aad u hoseesayso, waxaana ka mid Wasaaradah Kaluumaysiga iyo khayraadka bada, oo Wasaaradaasi waxay maalin dhoweyd markii ugu horeysay iibsatay 2 laash oo xeebta ku ilaalinayso waxan ku tababaryso 20kaa sanadood ee aynu dawlada ahayn.
- Waaxda garsoorka iyo cadaalada oo Miisaaniyadoodu aad u hooseyso, hadaan dadka garsoorka ka shaqaynaha la daryeelin waa meelaha dhibaatadu ka timaado.
- Ciidanka Ilaalada Xeebaha, oo aan jeclahay in la yidhaahdo Booliiska ilaalada bada, oo xeebaha inoo ilaalinaya dakhlina ka keenaya kaluumaysata shisheeya ee badaheena ka kaluumesanaysa oo ka cashuuraan,

- In 13ka Gobol ee dalku ka kooban yahay midkiiba 2 booyadood loo iibiyo, waayo sanad walba roob baa da'a biyihiisuna way ina dhaafaan, oo markiiba gurmadka abaaraha aynu ka qaylino, markaa waxaan soo jeedinayaa in 26kaa booyadood Gobol walba marka 2 la dhigo oo Majarafadona loo iibiyo oo loogu talo galo Gurmadka abaaraha.

Ugu danbeyntii waxaan taabanayaa 2%ka la sheego oo Gobolada Bari loo gooyo, anigu wali waxba kama arag oo Gobolka caynabo 1 gaadhi oo surfe ah ayaan ka arkaye, markaa waxaan soo jeedinayaa in 2%daa loo jiheeyo sidan soo socoda.

- In Goboada iyo degmooyinka cusub ee ka abuurmay Gobolada Sool, Sanaag iyo togdheer Xarumihii Adeega loogu sameeyo.
- In wada Maydh iyo burco isku xidha lagu dhiso oo meelo badan wax ka bilaaban yihiin, oo 2%kaa labadaa meelood loo kala qaybiyo ayaan kaga baxayaa.

**Waxaan kaloo talo ku soo jeedinayaa**:-

.

- In miisaaniyad sanadeedka qaran saami mug leh laga siiyo wasaaradaha deegaanka iyo horumarinta reer miyiga si ay deegaanka wax uga qabato sida forester conservationka ilaalinta ee wildlifeka, kaymaha iyo dhirta iyo daaqa oo hada heer halis ah maraya, dhuxushana la joojiyo wax lagu badelona la abuuro
- In Degmooyinka iyo Gobolada loo qoondeeyay waxay deegaamla li ilaaliyaan
- Wasaaradda kalluumeysiga si ay u abuurto ilaalin iyo shaqo
- Wasaaradda cadaalada/waaxda garsoorka iyo Gudidda cadaalada
- In la tayeeyo boliiska ilaalinta xeebaha
- Shaqaalaha iyo ciidamada gaar ahaan kuwa ay dhisan tahay aqoontooda iyo daacadnimada shaqo loo kordjiyo sanadkan 2012 50%, kharashaad kaa loo kordhinayana la go soo jarjaro wasaaradaha iyo hay'adaha maxadaxa banaan ee kale
- Ugu danbayn waxaan u arkaa in misaaniyadu mudan tahay in la ansixiyo .

5. **Md. Maxamed Axmed Obsiiye:-** shir-gudoonka, Mudanayaasha, Saxaafada iyo dadweynaha kaleba waad salaaman tihiin, runtii sidii caadadu ahayd had iyo jeer Miisaanayada la keeno waa dakhli iyo kharash isku sar go'an, waxaa meesha ka maqan hay'adaha aan dakhli lahayn meesha ay xukuumadu ka kabayso dee waxaan isleeyahay waa deeqaha dalka la siiyo, markaa waxaan leeyahay in badana waa laga hadlaye lacagaha deeqaha ah waa in Miisaaniyada lagu muujiyo, si loo ogaado wax-qabadka hay'adaha iyo wax-qabadka Xukuumda, Miisaaniyadan waxaa ku cusub oo si mahad gaara ah aan ugu jeedinayaa Wasiirkii hore oo ku soo daray Hay'adaha Madaxa banaan, hay'adaha madax banaanina waxay ina tustay in mashaariic badan ay ku jiraan oo hay'adahaasi qabtaan oo aan hore la inoogu soo gudbin, oo waxyaabahay qabtaan laga

xisaabtami karo, miisaaniyadiina lagu muujiyay sida hay'ada Wadooyinka oo loo qoondeeyay hawlo badan inay qabato iyo hay'ado kaloo badan.

Waxaa ku qoran meesha iyana, sida caadadu ahayd miisaaniyada laba mashruuc uun baa lagu muujin jiray, sanadkii hore waxaa ku jiray Mishiinada laydhka barbera iyo Idaacada dalkoo dhan gaadha, maalin dhoweyd oo aan idaacada tagayna wuxuu agaasihu ii sheegay inay hawlgalayso dhowaan oo ay qabanayso hawsheedii oo dalka wada gaadhi doonto, sida dastuurku sheegayo miisaaniyada iyo khudbad sanadeedka Madaxweynaha waa in Miisaaniyada lagu xusaa xalada maaliyadeed ee dalku marayo si loo ogaado oo aanay kadis ku noqon umada in marka laba dawladaood isbadalayaan oo kale si loo sii ogaado wixii deyn ah, dastuurkuna wuu waajib yeelay in la keeno, miisaaniyada way ka maqan tahay tii horena way ka maqnayd, markaa waa in taa lagu soo daraa oo loo fayjignaadaa.

Hay'adaha hay'daha madaxa banaan sidii aan ugu amaanay, hadana, dhinac kale dhaliin baa jirta, dhaliishaas oo ah hay'adahaas oo hore qaarkood u abuurnaayeen iyo kuwa xukuumda cusubi sameysay sharciyadooda in Golaha la horkeeno horaan u sheegnay, waana waajib in sharciyadooda Golahan la horkeeno, waxaa jirta hay'ado, Komishan iyo Agaasino Cusub oo miisaaniayda lagu soo daray sida ka muuqata Agaasin tacliinta Sare iyo Gudidda tacliinta sare oo muhiim oo waa loo baahan yahay, laakiin waxaa la ilaaway Gudida cadaalada iyo Garsoorka oo meesha ka maqan oo ah hay'do dasturiya, mar hadaanay Miisaaniyada ku jirin waxay qabanayaan lama garan karo, markaa waxaan soo jeedinayaa in lagu daro miisaaniyada oo Komishanka tacliinta waxaa ka muhiimsan Gudida Cadaalda, waayo cadaaladi fulimayso hadaanay dhaqaale ku filan haysan.

Miisaaniyadii hore iyo tan waxaa ka muuqata Hay'da Soyaal, oo ah hay'dii mujaahidiinta dhaqaale iyo kab ayaa loo talagalay, inay hawlo badan qabtaana waa lagu tala-galay oo dadkii agoomadii iyo naafada inay wax ka taraan, miisaaniyadii horena Madaxtooyadaa la hoosgeeyay lacagtiina waa la dhimay, miisaniyadan way ka maqan yihiin waxaan soo jeedin lahaa loogu celiyo oo la siiyo Miisaaniyadoodii oo loo waliba loo kordhiyo haday suurtogal tahay, waxaynu ognahay waxaa dalka ka dhaq-dhaqaaya doorashooyinkii dawlaha Hoose iyo Ururadii Siyaasiga ahaa sidii loo kala saari lahaa, waxaadna moodaa inaan Miisaniyadan waxba laga soo darin, Komishanka Doorashooyinka, markaa waa inay dawladu ka jawaabtaa wixii qorshe ee ugu tala gashay.

Shalay waxaa ka muuqatay Gudidda dhaqaalaha, oo khilaafkasi shaqadooda ayay wax yeelaysaa, markaa waxaan soo jeedin lahaa in Gudidaa lakala badalo.

**Waxaan Soo jeedinayaa:-**

- In Miisaaniayda aynu ansixino oo sii deyno, marka isbadal lagu sameeyo oo lagu daro wixii Goluhu soo jeediyo ee Muhiima**.**

**6. Xil Cabdiraxmaan Osmal Calin:-**

Ku dheeraan maayo Gudoomiye waxaan marka hore hanbalyay nayaa wasiirkii iyo Wasaarada maaliyada qaabka ay u soo dhigeen miisaaniyada iyo xajmiga ay u soo

sameeyeen iyo suuro galinta ay suuro galiyeen in ay misaaniyadu kor u kacdo oo ay gaadho cadad ka ay inoo soo shegeen

Anuu waxaan halkan ku hayaa document ka yimidey waaxda Garsoorka oo uu soo qoray Gudoomiyaha maxkamada sare ahna Gudoomiyaha Gudidda Cadaalada oo la yidhaahdo SALUUGA MIISAANIYADA LOO QOONDEEYAY WAAXDA GARSOORKA documentigaa waa loo keeney shirgudoonka nasiib daro shirgudoonku gudidda dhaqaalaha umay gudbin oo ku may darin qodobadii iyo meelihii ay is dultaageen ee shalay toole ay inoo shegeen.

Gudoomiye dhawaanahan waxaa lagu mashquulsanaa oo lagu jiray laba arimood oo muhiim ah oo Garsoorka sidii dib-udhis loogu samayn lahaa iyo dib u habayn loogu sameyn lahaa waana meelaha uu dayaca guud ee dalkani ka muuqdo una baahan in laga hagaajiyo, waana waaxda sadexaad ee Qaranka marka laga reebo waaxda fulinta iyo waaxda xeerdajinta.

Arinta labaad ee lagu mashquulsanaa waxay ahayn in lakala saaro awoodaha gudida fulintu ay ku leedahay waaxda garsoorka oo ah mid ay xukumi jirtay Wasaarada cadaaladu, dhaqaalaha waaxda garsoorka labadaaba shirweynaa qabsoomay cadaalada laga hadlayay oo document wayn ayaa laga soo saaray waxa laga qabanayo iyo dib u habaynta lagu samaynayaba, laba meelood ayay dhaqaalaha ka heli jireen midi waa waxyaabaha budgetka loo gudaro iyo talabaad oo ah waxyaabaha ay ka helaan international coumunityga ay siiyaan ayna suurto gasho marka ay xukuumadu Miisaaniyada ku darto.

Oo ay laba waxoo is bar barsocda yayihiin oo aan midiba gaarked u istaagi karin, waxaa halkan kamuuqda saluuga aan sheegayo laba arimood oo aan aad ulayaabay ayaa ku jira gudida cadaaladu waa gudidda hogaamisa garsoorka dalkeena ee kormeerta Gobolada ee garsoorayaasha kala badalidooda, dalacsiintooda iyo erigooda, maraa habayaraatee wax budget ah oo loogu daray majirto oo ugu qoran misaaniyada sanadka sobob looga saray magaranayo waana gudidda maamusha garsoorka dalka ee waaxda sadexaad, taasi waa kow waxaanay ubaahan tahay in la eego oo gudidaa budgetkeeda loogu daro.

Qodobka labaad ee aan isdul tagaagay waxaa weeyaan saluuga miisaaniyada Maxakamadaha hoose, hore wasaarda ayaa u maamuli jirtay imika waxaa la hoosgeeyay in ay maamusho gudida Garsoorka, markaa hadan idiin sheego baaxada ay leedahay maxkamahadaha hoose waxaa la isu yidhaa maxkamadaha hoose Waa maxkamadaha degmooyinka iyo racfaanka waxaan halkan inoogu asteysan in ay dalka ka jiraan 64 maxkamadood oo lix yihiin rafcaan sideed gobolada ah 50

maxkamadood oo degmooyinka ah waana ku shaqeeya dhamaantood oo hawl gala oo garsoorayaal leh oo hawl qabad maalmeed leh marka laga reebo musha harooyinka iyo gunada shaqaalaha oo iyaduna aad u liidata hawl qabadka ay qabtaan maxakamaha in taa leegi budget ka ugu jiraa for the hold country waa 502 malyuun waxaa ku jira marka maxkamad walba afar iyo lixdankaa maxkamadood loo qaybiyo waxaa maxkamad walba ku soo hagaagaya midiiba lixboqol iyo afar iyo konton kumsideed boqol iyo sideedboqol iyo sadex iyokonton shilin (654853 shilin) oo micnaha doolarkuna noqonoya $105 ayaa maxkamad walba ku soo hagaagaya sanad ka oo dhan waxaana ku jira hawl qabadka ama lacagtaa sabooka qareenka loo qabto marka qof ayana awoodiisu gaadhay loo qabanayo ayaa ku jira kharashkiisu waxaa kaloo ku jira markhaatiyaasha oo laga keeno miiyada gobolada waxaa ku jira kharashka dadweynaha ee lagala garsoorayaasha waxaa kaloo ku jira shidaalka stionaryga,iibsiga alaabta, biyaha iyo isgaadhsiinta, kharash askarta ay ka xaystaam ee nabadgalyo ahaan u kaxaysataan, waxaas o hawl ah iyagoo haya ayay ku soo hagaag taa sida aan hore u sheegay $105 dollar, hadaba waxaa is weydiin leh sidee loola xisaabtami karaa garsoorka noocaas ah, cadaalad intee leeg ayuu samaynkaraa garsoorahaasi adeeg garsoor oo tayo intee leeg ayay qaban karaan. Marka ayna dankalsooniya lahayn sobob ay ugu jiraan streture ka noocaas ah howl ay qaranka u qaban karaan majirto mana muqato.

Waxay u baahantahayin dib loo eego oo maxkamadaha nocaas ah ee hoose ee gobolka iyo degmada ee hawsha garsoorka ugu badani taalo in dib loo eego mana aan filahayn in wasaarda maaliyadu ay iska indho tirto hawsha garsoorku qabto. Takale ee iyana halkan ka muuqataa waxaa weeyi daryeelka caafimaadka iyokharashka nabad galyada oo iyaguna conpletely aan waxba ka jirin, waxaa dhacda howsha Garsoorku qabtaa waa hawl xaasaasiya waxaa timaada in qofku si nafsiya uu u doono, waxaa timaada dhaawac ku dhaca ama in la laayo oo dhawacyo soo gaadhaan halka qaarna ay naftooda ku waayaan, labadii sano ee ugu danbeysay waxaa dhacay dilal, dhaawacyo, ay u geeriyoodeen qaarna ilaa hada ay u jiifaan gudoomiyayaal max kamadeed iyo garsoorayaalba dhaawacyadaa soo gaadhay sidaa darteed wax caafimaada iyo wax nabadgalyo ahi conpletely uguma jiraan oo wax ka muuqdaa ma jiraan.

Waxaa lamida maxkamadaha hoose iyo xeerilaalinta ayaa iyaguna la mida oo dhulka taala oo iyaguna maxkamadahaa gobolada la saamiya oo ay iyaga wax ugu jiraa aanay jirin waxaa aynu soo sheegney in maxkamadaha dalku ay yihin 64 halka ay maxkama ay bishii ku soo hagaagayso lacagtaasi, hadaba kharashyada caafiamaan iyo wax yaabaha ee kamuuqda ama daryeel caafimaad lagu sheegaa ee miisaaniyad aka muuqanka ee misaniyada ugu jiraa waa $5 dollar mar loo qaybiyo 64 waa 3191 shilin oo u dhiganata $5 dollar markaa waxyaabaha sidaas ah ee inoo muuqanayaa maahan

wax loo adkaysan karo waana hawl adeg xaqna maahan dadka haw shaa intaa leeg qabta in maalin walba lagau dhaliilo oo warbaahinta lagala halo oo la yidhaa waxba ma qabtaan maaha wax yaaba wax ay u qaban laayi iina waa muskiladaa, Gudoomiya hdii aynu doonano in wax ka qabano arintaa Garsoorka oo gansaarno awoodana aan saarno sidoo wax looga qaban lahaa arintaa garsoorka si aanay dulmi u samayn oo halkaa horkeeno dhibaatooyinka ka jira arima ay dhibaatooyinku ka jiraana waxaa ka mida arimaha dhaqaalaha kamida

Waxaan soo jeedinayaa anigoo miisaaniyadda dhaliilo badan ku arkay oo leh siyaasada sheegayso miisaaniyadu ku hogaaminayso iyo qaabka ya u qorsheysan tahay laba wax oo si leh maahan, miisaaniyada siyaasad hageysa ee buugaagta ku taalaa iyohawsha miisaaniyada iyo qaabka loo qorsheeyay wax is leh maahan, markaa waxaa leeyahay anuu ma taataabanayo meelaha kale waayo tan ayaan aad u daneynayaa waana hay'ada aan la shaqeeyo hay'ada garsoorku ee Gudidayduna la shaqyso waxaan odhan lahaa indha baarlamaanku ka qabsan oo hawshaa sidii wax looga qaban lahaa culaykala saaaro wasaaradana lagu celiyo oo layidhaa wax daka u cuntama keena oo hawsha baxadaa leh wax lagaga qaban karo waad mahasna tihiin

7. **Md. Baar Siciid Faarax:-** shirgudoonka, mudanayasha iyo saxaafaduba waad salaaman tihiin, Miisaaniyadan wax badan baa wanaagsan, laakiin waxbaa yara habawsan ama meelihii ku haboonaa la galin, waxaana jira dhul aan wuxuu u baahnaa la gaadhsiin, sababtuna waxaa weeye isagoo ka fog dhulka, Madaxweynuhu markuu olalaha ku jiray wuxuu balan qaaday in wadadaa isku xidha Sanaag iyo Tog-dheer inuu dhisayo, nasiibdarona labadii miisaaniyadoo midna kama muuqato, waxaana dadka ka haysta dhibaato badan oo in badan baanu sheegnay, markaa wadadaasi waa muhiim waxaana soo jeedinayaa oo waliba Golaha ka codsanayaa in Wadadaa Miisaaniyada lagu daro, waxaan sheegi doonaa meelaha dhaqaalaha looga jaro.

Waxaa jira sanad walba abaar baa laga qaylinayaa, sanadkana laga qaylinayaa, waana wax soo jireena oo in badan daba laga waday, marka biyuhu soconayaa inaan wax ka qabsano waxaad moodaa inay inaga maqan tahay oo marka barwaaqo jirtona waynu faraxsanahay marka abaari dhacdona inaynu orodno oo dhamaan reer miyi baynu ku taxaluqnaa oo qofaanay taaban ma jirto, wasaarada Deegaanka waxaan jeclaan lahaa horena waxaan u sheegay in foresteriga dadkii ilaalin jiray la soo cesho, sababtuna waxaa weeye xaaluf badan baa jira, oo hadii seerihii la ilaaliiyo abaartaa dadku ku soo noqon lahaa.

Waxaan kaloo soo jeedin lahaa in Gobol walba laba dhaam laga qodo, oo waliba loo doono bacihii biyaha qaban jiray, waxa laga yaabaa in inbadan laga faa'iideysto, iyana waan sheegi doonaa dhaqaalahaasi meesha ay ku jiraan, waxaa jira arrin soo kordhaysay intaa oo cid kasta Gondeheeda timaadaa, oo dad waxaa dhaca in dadkeenaa caafimaadka qaba ayaa maalin walba naafooba, oo dagaal iyo shil baa maalin walba dhaca, markaa waa in naafada Miisaaniayda wax loogu daraa, tusaale ahaan hadii uu askari soo

dhaawacmo dee dadkoodii may dirsane dawlada baa dirsatay markaa waa askarigaa la daryeelaa markuu soo naafoobo iyo dadka kale ee naafooba waana arrin weyn oo jirta,
Shalay waxaan tagay jeelka hargeysa waxaan ka soo deynayay nin xidhan, waxaan joogay mudo saacad ah, dadkaasi waxy ka cabanayaan kaneeco farabadan iyo kulayl, markaa waxaan soo jeedinayaa in Jeelashaaa loo iibiyo Maro kaneecooyin, oo hadii aanay Miisaaniyada waxba ugu jirin aynu Gole ahaan u iibino, waa dad dhiban oo maro kaneecooyin dad-dag ah loo geeyaa, markaa arrinkaa dawlada iyo Goluhuba xil ha iska saaro, dhakhtarada oo uu ka mid yahay dhakhtarka hargeysa, koley hargeysaynu wada joognaa Goboladoo dhana way ka jirta dhibaatadaasi, dhakhtarka hargeysana wuu la qabaa, markaa ambalanceyo way ku yaryihiin dhakhaatirta, dhakhtarka hargiesa waa in lagu kordhiyaa oo 3 ambalance iyo bus ha loogu daro Dhakhtarka Hargeysa ayaan soo jeedinayaa, sidoo kale ceergaabo iyo degmada dhahar iyana lagu daro oo Ambalance malaha degmada Dhahari, Magalaada ceergabona waxay u jirtaa 200 Km, qofka gaadhi baa lagu soo qaadaa, oo dadka qayb ku jidka ku dhimata inta ceergaabo loo soo wada, markaa iyada hal Ambalance ha loogu daro ayaan odhan lahaa oo kaba badin mayo.
Sidoo kale Ceergaabo iyo Badhan way ku jiraan Miisaaniyada, laakiin wax laga xishoodo ayaa ugu jira, labada jaamacadood oo aad uga danbeeyay dalka intiisa kale oo intii jaamacaduhu dalka kale ka jireen aanay ka jirinba, markaa waxaan odhan lahaa jaamacadaas 100 milyan ha loogu daro, oo waynu garanaynaa dhibaatada ilmihii Seconderga ka soo baxay markuu waayo meeluu jaamacad ka galo.
Meelahaan isleeyahay, lacagahaa ha laga soo jaro waxaa weeye, intaa ka hor, horta waxaa la qabaa Obsiiye Hay'adaha Madaxbanaan in Golaha horkeeno oo la sharciyeeyo, Deeqahana Miisaaniyada lagu soo daro oo lagu muujiyo, Maxamed Xaashi maalintii uu shaqada ka tagay lacago badan buu sheegay oo Lacag ay south afrika inoogu deeqday Miisaaniyada inaan lagu darin buu sheegay, sidoo lacago 2%ka mid ahi inay Madaxtooyada ku maqan tahay ayuu sheegay oo ah 543 milyan iyo dhowr boqol oo kun, markaa waa in la cadeeyaa, oo meelihii ay ku magacawnayd waa inay martaa, oo wixii loogu talagalay lagu qabto, ilgaarana lagu eego Goboladaa bariga oo dhibaatooyin farabadani ka jiraan.
Meelo ayaa jira aan garan waayay waxay yihiin, oo ku haboon in Miisaaniyada laga jaro, waxaana ka mid ICT commishan, anigu garan mayo, waxaan odhan lahaa lacagtiisana meelahaan soo sheegay halagaliyo, waxaan kaloo jira sanadkii horena ku jiray miisaaniyada oo ilaa hada garanayn WFP baa miisaanaiyada lacag farabadan baa ugu jirta, WFPna iyadaa dadka caawin jirtay, lacagtaa iyagana meelahaan soo sheegay ha lagaliyo, waxaa kaloo aan ku arkay Miisaaniayda Hay'ada Qurba jooga, Qurbajoogtuna dalka iyagaa wax soo galin jiray oo soo caawimi jiray, waxa loo sameeyay oo lacagtaa loo siinayo iyadoo dadkeenii gaajoonayo oo tacliintii iyo caafimaadkiiba liitaan, markaa waxyaabahaas danbi weyn bay inagu noqonayaan.

Markaa meelahaas uun ha laga jaraan soo jeedinayaa meelo badan oo kale ayaa jira iyaga waan iska dhaafayaa ,markaa Meelahaa marka intaa laga soo jaro oo arrimahaan hore u xusay lagu qabto, Hay'adaha madaxbanaana ha la sharciyeeyo, waad mahadsantihiin.

**8.** **Md. Cumar Axmed Saleebaan:-** Gudoomiye anigu umaan bixin wax badan, laakiin waxaan u yar arkaa meeshii oo cidla ah in la inaga dubo oo dhawr qof

fadhiyaan, anigu laba xaalo oo yar yar baan ka hadlayaa, Wasiirkii hore ee Maaliyada aad iyo aad baan ugu mahadnayaa waayo wuxuu markii ugu horesay dalka u taagay Miisaaniyad ay ka muuqato horumarin, oo labalaab korodhay, taas oo inoo suuragalisay waxyaabo badan inaanu qabano, sida tacliintii hoose oo bilaash laga dhigay, oo uu kala shaqeeyay madaxweynaha ilayn dawladiisii bay ahayd, hase ahaatee markuu madaxweynuhu ka tagay Wasiir cusub baa yimi, markaa waxaa inagu waajiba inaynu xukuumda hagno oo khaladna u sheegno, wixii saxana kula shaqaynol markaa Wasiirka xaq buu inoogu leeyahay Gole ahaan wixii aynu ku aragno miisaaniyada ee dal-daloola u sheegno.

waxaan eegay miisaaniyada, waxaa kordhay 109 bilyan oo aan ka soo qaadayaa Guud ahaan, waxaa la jaray oo Miisaaniyada laga jaray Miisaaniyadii 2011 lacag dhan 321 bilayn, hadaad u fiirsataan waxaad arkaysaan hay'ado badan oo aynu ka midnahay in Miisaaniyadoo 2011ka la jaray, oo iyana ka mid yihiin Ilaalada Xeebaha, Quality Controlka, komishanka Aidiskaa, Difaaca iyo kuwa kale oo waa 24 hay'adood iyo Wasaaradood, lacagtaa la jaray markaan isugeeyo **321 bilyan** bay noqonaysaa, marka inta korodhay oo **109 bilyan** ah aad ka jarto lacag aad u farabadan baa halkaa ka soo baxaysa oo maqan, markaa waxaa ku jirta miisaaniyadii (inbalance) isu-dheelirnaan la'aan.

Wasiirka hada yimi ay hadhaw isaga dhibaato galinayso, hadaan manta baanka tago oo idhaahdo mushaharkaygii April ha la isiiyo, marchna la ii raaciyo oo la yidhaahdo dakhliga isoo galay Mushaharadeydii oo dheeraadka ahi waa intaas, dee dakhli isoo galay ma jiree waa Mushaharadeydii, halkan waxaa nleeyaha Gudida dhaqaalaha idinkaa wixii nooga masuulee halkaa dib u eega oo dib u akhriya, lacagtaasi halkay marayso ama halkay galayso.

Waxaan kaloo ku daraya, waxaa miisaaniyada ku jira 1% hawlgabka ah, hawlgabkana sharci umaynaan samayeyn, waana wax loo baahanyahay, maalin dhoweyd oo aanu ka sheekaysanay Muxumad Aw cabi in loo baahan yahay in sharcigaa in la sameeyo oo shaqaalaha dawlada oo dhan uu wada khuseyno, inagu barlamaankii baynu nahay Gudoomiye wakhtibadana inooma hadhin waxayna ila tahay in sharcigaa u sameyno bayshanka ama hawlgabka la yiraahdo.

**Waxaan ku soo gabo-gabaynayaa:-**

- In Gudida dhaqaaluhu ina fahansiiso oo khilaafkaa dhaqaale ee aan soo sheegay.
- In doorasha dawlada hoose sidii uu xildhbaan obsiiye sheegay waa in lifaaq lagu sameeyaa Miisaaniayda Doorasha Dawlada hoose, hadii si kale loo nidaamiyayna Gudidda dhaqaaluhu ha Ina fahansiiso.

9. **Md. Maxamed Jaamac Cilmi**:- Shir-Gudoonka iyo Mudanayaasha waad salaaman tihiin, Gudoomiye Miisaaniyada asaaseeskeedu waa dastuuri waxyaabaha Goluhu xaq u leeyahayna weeyaan, waxaynu aragno inay meel ka dhiman yihiin ama siyaado ku yihiin inaynu isu miisaano waa muhiim, waayo laba ama sadex qof waxay soo sameeyeen iyo 82 qof waa kala jaad, waxyaabaha ka mida waxaa weeyaan markii gudidu dhaqaaluhu halkan ka hadlayeen waxay sheegeen in Wasaarado iyo Meelo soo cawday ay jiraan, dee waa xaq dastuuriya oo la iangu leeyahay ee baryo maaha, iyadoo taasi jirto way ka tageen iyagoo sheegay in cabasho loo keenay, xataa lifaaqood may odhan waxa naga badheedha ah ama naga proposal ah in meelaha wax laga qabto, maxay inoogu keenayaan hadaanay waxba ka odhanayn, maaha miisaaniyada iska saxeexa oo Gudibiya maaha, waa in Wasaaradaha iyo Hay'adahaa wax tirsanaaya in dib loogu noqd.

Tan kale, oo aan la yaabay waxaa ka mida miisaaniyadaha Hay'adaha Caalamiga ah ee la leeyahay waa NGOs 200 iyo dheeraad malyuun baa dalka soo gala, meel alaale iyo meel ay miisaaniyadahaa ina soo marayay kaga jirtay ma jirto, Wasaarada Maaliyadu kama war hayso, budgetkan kaasaa laba jeer ka badan, Walaa Qorshayntu kama warhayso, waxay ku dhacdaa baanankaas, waxaana lagu qaadaa magacyada NGOskaas, oo Siyaada Calaa daalika wasaaradahaa lagu soo qoraa oo magacooda kula baxa oo gaadhi wanaagsan iyo sarafadooda ayay gashaa, Markaa Gudoomiye Wasaaradaha Maaliyada iyo Qorsheyntu waa inay ka jawaabaan arrinkaa, lacagtan yar ee aynu ka qaado islaantan caanalayda ah ama tomaadhada iibinaysa tanaa kaga xaq leh meesha ay marayso Wasaarada Maaliyadu.

Markaa Gudoomiye Wasiirkii Maaliyadu waa sharci dasruuriya inuu halkan yimaado, oo halkan ka cadeeyaa wuxuu ka qabo ilayn waa wax loo dhiibay, waxaan maqalnaa intaasoo lacagaan ka tagay ama wareejiay ama intaas oo khaasha, markaa isagu ha cadeeyo waxa ka jira, isna Keydki dalka meesha kuma yaal, waxaa loo baahanyahay in la ogaado waxa qaranka u yaala, waayo duruufo badan baa inagu geedaaman si wax loogu qabo, Midakale oo dhibaatada ahi waxaa weeye Muu saxeexin Gudoomiyihii Maaliyada ee barlamaanku Warbixintan la inoo soo gudbiyay,Markaa waxaan soo jeedinayaa in dib arrinkaa loogu noqdo oo iyadoo wax khilaafa ku jirin ay wax wanaagsan inoo soo gudbiyaan, inaga khilaafkeenu waxba inoo tari mayo., waana in Gudida dib la isugu yeedho oo dib loogu noqdo.

Nuqdada kale waxa weeye, 180 malyuun buu carabku ka qaataa maxjarka wax alaale wax cashuur oo laga qaado ama stamp duty ah oo Miisaaniyadan ku jirtaana ma jirto, hagay qabataa lacagtan uu qaataa, waa in dib loogu noqdo oo Gudidda dhaqaaluhu soo eegtaa, lacagtaasi waa lacag adag oo dalka ka tagaysa, markaa waa la soo galiyaa miisaniyada oo Manfacaa dalka ka baxaysa, la soo cadeeyaa.
Waxaa jirta wasaarada Maaliyadu 190 bilyan bay leedahay, wasaaradihii Halbawlahaa ee Caafimaadka, Wasbarasha iyo Aminigaa laasqoray ilaa saylac ilaalinaysa way ku soo

laban laabantaa, hadaanay jirin Miisaaniyad daawlada hoose doorashadooda ugu jirtaa ma jirto oo Gudidan Diiwaangalinta ee shaqaynaysa wax ugu jiraa ma jiraan taana waa in dib loogu noqdaa, waxaan maqlaayay Wasiirada biyaha iyo Qorsheynta waxaa loo ogolaaday 27 malyuun oo dollar oo Ceelal lagu qodayo iyo harooyin xagay ku taalaa waa bayaan ka soo baxay Xukuumadee, dee ma diidanin waa in miisaaniyda lagu dara, ilayn ma diidani in la ansixiyo, waa in wax alaale wixii dalka soo galayaa waa in dawladu ka war haysaa, lagu qoraa miisaaniyada.

Waxaaan soo jeedinayaa, hay'adahaa ama duwali ha ahaadaan ama yayna ahaane waa inay hoos yimaadaa Xafiiska Madaxtooyada oo looga sameeyaa xafiis, waayo meel lagu kantaroolo malaha, tafaahun uun baa ka dhaxaysa wasiirka iyo Hay'ada dahabshiil baana lagu shubayaa magaciisaana lagu qorayaa, mushkilada ina haysataa Qiyadadu waa inaanay waxoo dhan faraha uga qaadin oo ay ogaadaa waxa lagu qabano.

Waxaa la yidhi maxjarka hoos bay dhigtay Wasaarada Maaliyadu Cashuurtii, dee cashuurta waa in la keenaa oo la sharciyeeyaa, waanu ila garanay maaha wax la yimaado, waa la keenaa wixii sharciya, Nimanka Mujaahidiinta ahi waxba kuma laha, qaadiyaashu waxba kuma laha, iyana waa arinkooda dib loo eegaa, waa amnigu cadaalada kama soo hadho, oo cadaalda iyo amaanku way garabsiinayaa, Intaasaan ku soo gaba-gabaynayaa.

10. **Md. Axmed Yaasiin Sh. Cali Ayaanle:-** bismilaahi raxmaan raxiim, anigu waxaan ka hadlayo waa in iska soo koobayaa, markaynu kharash iyo dakhli miisaameyno oo aynu uga fakarno sidii dadna u ah Qaranka ama wax uga hagaajino, waxaa loo baahan yahay hayteena iyo kharashku inay miisaanaad dee wuxu yahay waxaa ina horyaala dee sidii dal dakhliguusu biliions dollar yahay waxaaguna waa mushaakhil, macnaha baahida hortaala iyo kharfash in horyaala waxaynu ku tilmaami karnaa badweyn in dhibic lagu tuurayo, hadaba badweyntaan ayaa u baahan micno loogu tuuro, oo aan la iskaga tuurin ilayn way ku dhexbaa'baysaaye.

tusaale ahaan, lacagta 2% ee bariga loo qoondeeyay waa wax badan lacagtaasi hadii sidu ugu haboon loo kharashgaraynayo wax badan baa iska badali lahaa Gobaladan bariga oo way soo afjarmi lahayd, ilayn culeyskani qaranka saarnaado maahee Gobaladana cadaalada daro ka jirtee, Gobaladii bay ka hadheen ha la soo gaadhsiiyaa la yidhi, iminka lacagta ku qoran miisaaniyada ina hortaan waa 22 bilyan 2%kaasi oo udhiganta 5 malyan dollar, haday shantaa malyan farsamo u gasho Gobolada bariga way ka muuqanaysaa oo goboladay soo gaadhayaan, kharashka intaa le'egna next yearkaa laga raysanayaa.

laakiin haday Wasaaradii Maaliyadu tiraahdo hadba 2% kii madaxtooyaday amaahatay, oo aynu ognahay madaxtooyada waxa kharash ayt haystao , hadii aynaan gaadhayn Goboladii bariga dee waxaa haboon in laga daayo culeyska dadka ay ku haysto waay kiishka sonkontorta ee masaakiinut cabayso baynu saran lahayn, iminka dhowr sanadood baynu 2%kaa Gobolada bariga laga hadlayay goboladiina ma gaadho, Markaa aniug

waxaan soo jeedinayaa hadaan halkan secendment uga helo in 2%kaas kansalgareeyo maadaama dadkiina culeys ku tahay hadkii loogu tala-galay aanay gaadhin.

Tan kale ee aan doonayaa inaan ka hadlo waxa weeye, Budhcad badeed baa la inoo keenay maxaabiisa, budhcadbadeeda la inoo keenay waxa aynu Godobta intaa le'eg ku galnay dee inay miisaaniyada ka muuqato ahayd, ma musuqmaasuq baynu u dhimanaynaa, ilaynu maslaxad baynu siisanay qof aan danbi inaga galin oo Ganacsatadeenii Godob u keenaya, wax lagu haystona aynaan garanaynin, dalalkii aduunayadana dhaga libaax ku noqday, kii kaluumeysanayay siishels ugu tagay, markaa waxaa godobta intaa le'eg lagugalay meeday maslaxadii ma musuqmaausbaa, waa in si cad loo cadeeyaa waxa in maxaabiis aana danbi inaga galin oo inagu aynaan xukumin waxaynu ku aqbalnay waa in la soo cadeeyaa, hadii kale waa xilgudasho la'aane waa in Golohu Go'aan ka gaadhaa arrintaas.

Anigu todobadii sano ee Golaha ku jiray Miisaaniyada waxa la yiraahdo Gudidda dabagalka xasuuqa, walina maan arag warbixin ay gudidaasi soo saartey, waana culays maaliyadeed oo qaranka saran, oo sanad walba dhowr boqol oo milyan baa miisaaniayda ugu jira waxay qabatona la garan mayo, markaa shilimaantan islaamaha cadceedaa fadhiyaa laga soo ururiyay ee sugaya in Cusbitaal iyo horumar loogu dhiso in meel aana lagaranayn uu ka baxo maaha.

dalkeenu waa faqiir laakiin waxaynu aaminsanahay kharaad farabadan oo dabiiciya leenahay mustaqbal wanaagsanina inoo yaalo oo maalin maalmaha ka mid isbadal dhaqaale uu imanayo, isbadalkaa aynu sugayno ee ilaahay wax himaladeenu tahay ina gaadhsiiyo waa resourcekaa aynu haysano dad inoo qaadi kara iyo dhaqaale farabad diyaarsano, ciyaalkeenu waxbarasha inta hore ee elemneteriga ilaa secondarga wuu la soo tacaalaa, markuu jaamacada yimaado ayaa culeys dhaqaale fuulaa, oo Matalan semeterkii inaka jaamacadii $200 baa laga doonayaa, waalidkii dakhliguusu dhexdhexaadka ahaa oo laba wiil iyo inan jaamacadii u galeen ee semesterkii $600 oo dollar laga doonayaa ma keeni karaan midbuu ku mitidaa labana way saaqidaan, waa human capitalkeenii oo lumaya, hadaba waxaan hadalkaygii ku bilaabay wax yar ee aad haysato waa inaad farsameysataa.

Waxaan halkan ka soo jeedinayaa in ardeyga semeterka laga badin $70-80 dollar, oo intii hal ardey laga doonayay 3 ardey wax ku dhigan karaan, oo jaamacada 100% kaabis miisaaniyada loogu sameeyo kharashka halkaan uga goynayaan tilmaamayaan, markay jaamacaduhu kharashkaas helaan khasab laga dhigo inaanay semesterkii ka badani $70-80 dollar, waxaan ka goynayaa kharashkaa madaxweynuhu waa Economista ah Maxtooyadana kharash badan baa ku jira wuu yaqaanaa sida wax loo farsameyn karo, ma doonayo inaan dhaawac ugaysto dakhliga uu ku shaqaynayo ee siyaasin iyo ijtimaaciyan,

laakiin lacagaha tamashlaynta u badan ee madaxtooyada ku jira 10 bilyan ayaan ka jarayaa, ma doonayo caafimaadkii iyo shaqada socoto, oo 6 bilayn oo gurmad ahi ka badan madaxtooyada.

Waxaa jaamacadah halkan ugu jira halkan 1 bilyan iyo 12 milan, markaa 12 bilyan ha looga dhigo, jaamacaduhu markay intaa helaan waa khasab inaanay ardeyga semesterkii kaga badin $80 dollar wax qabad muuqda ayay noqonaysaa oo miisaaniyadu ka sameynay oo public ina soo doortey aynu u qabanay, waan soo Calculategareeyay, waxay noqonaysaa kharash Hay'ad u cadilmeysaa aanay jirin oo la odhanayn lacagtii ay shaqada ku qabanaysay baa laga jaray, oo waxaa yar baan ka jaray, markaa waxaan leeyahay isbadal ijtimaaciyaa la dareemayaa.

In wasiirku yimaado oo su'aalo weydiino waajib qaran bay ila tahay, su'aalo ayaan ka weydiinayaa waana loo baahan yahay, Deegaanka Baar baa ka hadashay waa ku raacsanahay in la abuuro environment protection in la sameeyo oo foresteryga la ilaaliyo waan soo jeedinayaa, wasaaradaha la shaqeeya hay'adaha caalamiga ah, sida wasaarada wax barashada, caafimaadka iyo Macdanta iyo biyaha, dee wasaaradu waa kuwii qaranka, dalkhligan ay helayaana maaha iyagu private company maahee waa kuwaan kharashkooda halkan kaga hadlayno, hadaana musuqmaasu jirina wax manciyana in halkan lagu soo daro waxay Hay'adaha ka helaan anigu ma arko, wixii manciyaana waa musuqmaasuq, inaguna waxaynu halka u fadhinaa inaynu qaranka saxno wixii ka khaldan.

Awoodeena dastuuriga ee miisaaniyadu waxa weeye dakhlig kastoo kharaskastaa wuxuu baxay inaynu ogaano weeyaan, Gudidda dhaqaale runtii fashal baa ka muuqda markaa Gudoomiye ha laka diro ayaan soo jeedinayaa.

.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| **----------------------------------------------------------** | **-------------------------------------------------** |